SOMALI

Infosheet 5. Dublin Family Reunification

# KU OGOW XUQUUQDAADA

# SI'AAD ULA MIDOOBDID QOYS KAAGA

LEGAL CENTRE LESVOS

**Xaashidan macluumaadka waxa ay ka kooban tahay macluumaad guud oo ku saabsan xuquuqda isukeenida qoyska iyada oo loo marayo "Xeerka Dublin III" ee magangelyo doonka ee Giriiga laga bilaabo 1 Luulyo 2024.**

**Ma aha mid dhameystiran, oo ku xiran isbedel iyo waxaan kugula talineynaa inaad la tashato qareen shatiyaysan inuu ku dhaqmo sharciga Giriiga ama NGO-ga bixiya taageerada sharci ee ku saabsan kiiskaaga gaarka ah xaalad kasta.**

Haddii aad ku leedahay xubnaha qoyskaaga mid ka mid ah dalalka "Dublin" ee soo socda:

**Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czech Republic, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, the Netherlands, Hungary, Iceland, Ireland, Italy, Latvia, Lichtenstein, Lithuania, Luxemburg, Malta, Norway, Poland, Portugal, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden, Switzerland** oo aad rabto inaad dib ula midowdo iyaga, waxaad codsan kartaa habka loo yaqaan **'isku keenida qoyska**' ee hoos yimaada "xeerka Dublin".

Habkani waxa laga yaabaa inuu kuu ogolaado inaad ku biirto qoyskaaga meel kale iyada oo la raacayo shuruudaha hoos lagu sharaxay.

Haddii aad rabto inaad ku biirto qoyskaaga Boqortooyada Midowday, waxaad ka heli kartaa macluumaad iyo taageero sharci websaydka Taageerada Sharciga Qaxoontiga ee hoos yimaada xidhiidhkan:

**https://www.refugeelegalsupport.org/uk-family-reunion**

**YAA CODSAN KARA DIB U MIDAYNTA QOYSKA?**

- Waa in aad Giriiga magangelyo-doon ahaan uga diiwaan gashan tahay oo aad xubin qoys oo dhow ku leedahay waddan kale "Dublin" (fiiri liiska sare).

- Xubinta qoyskaaga waa inuu caadi ahaan ahaado magangalyo doon ama lagu siiyay sharci qaxootinimo ama ilaalin hoose oo wadankaas ah.

- Xubnaha qoyska ee dhow waa:

  - **Ninkaaga** ama **xaaskaaga**,

  - **Lammaanahaaga** (xitaa haddii aanad guursanayn, haddii aad caddayn karto inaad leedahay xidhiidh deggan,)

  - **Carruurtaada haddii aysan guursan oo da'doodu ka yar tahay 18 sano,**

  - Haddii aad tahay ilmo aan lala socon (kayar 18 jir): **waalidkaa(iinta), walaalkaa, walaashaa, eeddadaa, adeer ama awoowe.**

- Haddii aad tahay qof weyn oo aad **ku tiirsan tahay daryeelka** qof ama qof uu ku tiirsan yahay daryeelkaaga (tusaale, adiga ama waxay u baahan yihiin in lagaa caawiyo hawlaha maalinlaha ah sida socodka, wax cunida, isticmaalka musqusha), waxa kale oo aad codsan kartaa in laguu mideeyo. lammaanahaaga aan la qabin, hooyada, aabbaha, ilmaha, walaal ama walaashaada. Si kastaba ha noqotee, waxaad u baahan tahay inaad muujiso xiriirka ku tiirsanaanta, ama sababo kale oo bini'aadantinimo (tusaale ahaan haddii aad leedahay xaalado caafimaad ama maskaxeed oo daran iyo/ama aad halis ugu jirto waxyeelo sababtoo ah xaaladahaaga nololeed ee Giriiga kuma filna, iwm. ).

- **Qof kastaa ma awoodo inuu sameeyo codsiga noocan ah sababtoo ah wuxuu leeyahay shuruudo adag oo dheeraad ah iyo dukumeenti xaaladaada ah ayaa laga yaabaa in la codsado.** Xaaladahan waxaa lagula talinayaa inaad la tashato qareen kugula talin kara oo kuu sharxi kara shuruudaha gaarka ah iyo haddii aad buuxiso shuruudaha codsiga.

# SIDA LOO CODSADO DIB U MIDEENTA QOOYSKA

- U sharax masuuliyiinta Giriiga in aad xubno qoys ku leedihiin wadan kale oo Yurub ah kuwaas oo aad rabto in aad dib ula midowdo **inta lagu jiro diiwaangelintaada magangalyo doon ee Giriiga, ama ugu dambayn. Ama inta lagu guda jiro wareysiga magangalyada.**

- Codsigaaga midaynta qoyska waa **in lagu soo gudbiyaa 3 bilood gudahooda laga bilaabo diiwaangelintaada magangalyada. Fiiro gaar ah: isukeenida qoyska ee Jarmalka codsigaaga waa in lagu soo gudbiyaa 3 bilood gudahood markaad timid Giriiga.**

- **Wakhtiyada kama dambaysta ah ee lagu dabaqi karo waa kuwo aad u adag,** markaa iska hubi inaad si cad u sheegtay **sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah** inaad rabto inaad dib ula midoobo xubin qoyskaaga ah.

- Sii Adeegga Magangalyada Giriigga dukumeentiyada soo socda:
    - **foomamka oggolaanshaha saxeexan,** oo muujinaya in adiga iyo xubinta qoyskaaga labadiinuba aad ogolateen inaad dib ugu midoobaan dalka kale;
    - **faahfaahinta xiriirka saxda ah ee xubinta qoyskaaga;**
    - **koobiyada dukumeentiyada xubnaha qoyskaaga** ee xaqiijinaya xaaladdooda dalka kale;
    - **caddaynta xiriirkaaga,** oo ay ku jiraan: buugga qoyska, shahaadada guurka, shahaadada dhalashada ama waraaqaha kale ee ka yimid waddankaagii; sawirrada qoyska, waraaqaha, bayaannada markhaatiga ee qeexaya xidhiidhkaaga, sawirada fariimaha iyo diiwaanka wacitaanka.

# GOORMA AYAAN LA MIDOOBI QOOYS KEEYGA?

Waa wax caadi ah in midaynta qoysku ay **qaadato ku dhawaad hal sano,** laga bilaabo soo gudbinta codsiga ilaa inta laga gaadhayo wareejinta wax ku oolka ah ee dalka kale.

- **Haddii codsigaaga midaynta qoyska uu aqbalo** waddanka kale, Greece waxay haysataa 6 bilood laga bilaabo wakhtigaas si ay kuugu diyaariso wareejintaada halkaas.  Giriiga ayaa mas'uul ka ah habaynta iyo bixinta kharashka duulimaadyadaada. Adiga/qoyskaagu ma bixin kartid kharashka duulimaadyadan si loo dedejiyo wareejinta.

- **Haddii codsiga dib u midaynta qoyskaaga uu diido** waddanka kale, waxaad codsan kartaa in dib-u-eegis lagugu sameeyo 3 toddobaad gudahood.  Weydiiso nuqul ka mid ah warqadda diidmada oo raadso gargaar degdeg ah qareen ama hay'ad bixisa taageero sharci.

Waxaa jira wadooyin kale oo loo maro isu keenida qoyska **oo loo maro safaaradaha ama hababka kale ee qaranka.** Kuwani waxay leeyihiin shuruudo isku mid ah oo ku saabsan xidhiidhka dhow ee loo baahan yahay.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waddooyinkan, waa inaad raadsataa talada qareen ama hay'ad bixisa taageero sharci.

XASUUSO

- **Weydiiso taageerada qareenka Giriigga ama hay'ad bixisa taageero sharci** si ay u raacdo kiiskaaga, hubi in wakhtiyada kama dambaysta ah la ixtiraamo, oo kula xiriir magacaaga mas'uuliyiinta Giriigga ee mas'uulka ka ah.

- Sida habboon **xubnaha qoyskaaga ee dalka kale waa inay la xidhiidhaan qareen ama urur sharci** oo halkaas jooga si loo hubiyo in masuuliyiinta labada waddan ay ka warqabaan codsigaaga oo ay uga baaraandegaan waqtigiisa.

- **Hayso dhammaan dukumeentiyada** ay ku siisay Adeegga Magangalyada Giriiga ee laxidhiidha codsigaaga midaynta qoyska.

- **Waydii Adeegga Magangelyo ee Giriiga wixii warar** ah ee ku saabsan xaalada codsigaaga midaynta qoyska.
  Waxaad taas ku samayn kartaa adigoo email u diraya: **as.dpt.ndu@migration.gov.gr** kuna diraya lambarkaaga kiiska, lambarka faylka iyo magaca**.**

- **Ku wargeli maamulka isbeddel kasta oo suurtogal ah fursadda ugu horreysa ee suurtogalka ah:** haddii adiga ama xubnaha qoyskaaga aad beddeshaan lambarka taleefanka, cinwaanka, ama faahfaahinta xiriirka kale.

LEGAL CENTRE LESVOS

**WhatsApp:** +30 694 961 8883
**Landline:** +30 225 1040 665
**Iimaylka:** info@legalcentrelesvos.org
**Facebook:** www.facebook.com/LesvosLegal
**Cinwaanka xafiiska:** Komninaki 20, Mytilene 81100 **Saacadaha shaqada :** Isniinta ilaa Jimcaha - 10 subaxnimo ilaa 2 galabnimo